Tiro koobka 2010: waxa uu ku jiraa gacmahayaga.

Waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan hey'adaha u adeega bulshada?

Hayada tirokoobka wadanka waxay cadeynaysaa tiro ahaan inta aan la egnahay sanadka 2010

10 sano kasta tiro koobka la qaado waxa ay bedeshaa wakiilnimida siyaasadeed, waxayna jiheysaa habqeybeedka kaalmada dowlada federaalka oo balaayiin doolar gaaraysa. Hayadaha dadka u adeega waxa ay si toosa ugu xiran yihiin dadka ay u adeegaan sidaa awgeed idinkoo ka mid ah tiro koobka 2010 waxa aad u baahan tihiin in aad gaarsiisaan umada howshaan aadna hubisaan in aan qofna laga tegin,. Gaaritaan tiro sugan oo saxan, waxay ku jirtaa gacmahayaga.

Tirokoobka: Fikrad gaaban

- ✓ Dastuurka wadanka waxuu farayaa tirokoob in la qaado 10 sano oo kasta.
- ✓ Tiro koobku waxuu farayaa in qofkasta la tiriyo oo degan dalkaan Mareeykanka: kuligood 50ka gobol , Caasimadda –Washington DC, Puerto Rico, US Virgin Islands, Guam, Common Wealth of the Northern Marina Islands and American Samoa. Waxaa la tirakoobayaa da'a kasta oo degan waddankaan iyadoo aan look ala saarin midab ahaan, bah ahaan iyo in aan loo eegin in uu hesto sharciga wadanka iyo in kale.
- ✓ Tiro koobka 2010 wuxuu abuuri doonaa shaqooyin ku meel gaar ah wadanka oo dhan.

waxa uu ku jiraa gacmahayaga: Waa muhiim ka qeybgalka aad ka qeybgalaysid tiro koobka 2010.

- ✓ Sanad walba waxaa dowlada federaalka ay siisaa gobalada iyo shacabka lacag ka badan $300 billion Iyada oo loo tixgelinaayo tirakoobkooda. Taasi waxa ay ka badan tahay $3 Trillion 10-kii sanadood.
- ✓ Aqoonta bulshada degaanka waxa ay caawinaysaa go'aan gaarayaasha si ay u sameeyaan golayaasha carruurta lagu haayo iyo halka bulshada iskugu tagto.
- ✓ Maamulka bulshada iyo dowladuba waxay isticmaalaan tirada deegaanka si ay u dhisaan bulshada horumarinteeda una tixgeliyaan halka dhibaatada ka jirto iyo baahida deegaankaas.
- ✓ Aqoonta tiro koobka waxay caawisaa helida dadka sida iskaa wax ugu qabso ugu shaqeeya bulshada dhaxdeeda iyo tirada dadka u baahan in loo shaqeeyo iyo qoritaanka qorsheyn saxan.

Dhameystirka su,aalaha tirokoobka 2010: Sahal iyo sugnaan.

- ✓ Tiro koobka 2010 su'aalihiisu waxa ay ku weydiinayaan su'aalo sahlan oo ay ka mid yihiin magaca, da'ada , xaas ahaan, midab ahaan, da'ada iyo taariikhda dhalashada, dhadig/lab, jinsiyadda iyo in aad leedahay guriga aad degan tahay iyo in uu kiro yahay. Su'aalahaan sahlan ka jawaabistooda iyo ku soo diristooda boostada waxa ay kugu qaadanysaa waqti gaaban.
- ✓ Heyadda tiro koobka bixin meyso macluumaadkaada qof ahaan iyo qoys ahaan muddo ilaa iyo inta laga gaarayo 72 sanadood ah.

Tiro koobka 2010: su'aalaha inta badan la isweydiiyo

Maxay uga qeybqaadanayaan headaha bulshada u adeega tirokoobka 2010?

Tirakoobka bulshada degaan waxa ay bedeshaa mustaqbalka bulshada iyo codka ay ku leeyihiin baarlamaanka federaalka ah.

- ✓ Aqoonta tirokoobla laga helo waxa uu sahlaa in la ogaado meelaha ay ku yaaliin dugsiyada , wadooyinka waaweyn, xanaanada carruurta iyo dadka waaweyn iyo dhowr kale.
- ✓ Ganacsigu waxa uu isticmaalaa tirokoobka si ay u helaan suuqyada waawyn iyo guryaha cusub iyo wixii la mid ah.
- ✓ Madaxda dowladda waxa ay isticmaashaa tirada tirokoobka si ay lacag iyo kaalmo u siiyaan meelaha u baahan iyo heyadaha aan faa'iido doonka aheyn.

Sidee buu uga bedelan yahay tirokoobka 2010 kuwii horey loo sameeyn jiray?

Tirokoobyadii hore lixdii qoyskba hal qof ayaa su'aalo badan oo ku saabsan macluumaad qoto dheer la weydiin jiray , kuwaas oo ah qofka noloshiisa iyo dhaqaalihiisa, laakiin tirokoobkaan 2010 qof walba waxa uu helayaa su'aalo kooban oo ay sahlan tahay dhameystirkooda iyo soocelintoodaba. Sanad walba waxaa la aruurin doonaa tirokoob laga qaadayo qeyb yar oo bulshada ka mid ah si loo helo macluumaad joogto ah.

Macluumaadka ay soo arruuriso hey'adda tirokoobka ma la xafidi doonaa?

Haa, qof walba oo u shaqeeya hey'adda tirokoobka waa la dhaarinayaa si ay u xafidaan macluumaadka. Qofkii jebiya sharcigaas waxa uu muteysan doonaa xabsi shan sanadood ah iyo/ama $250,000. Sida sharcigu yahay hayadda qorsheyntu marna lama qeybsan karto macluumaadka dadka heyadaha kale sida heyadda socdaalka iyo heyadda xanaanada bulshada.

Maxay muhiim ugu yihiin heyadaha bulshada caawiya tirokoobka 2010?

Hayado ka badan 140,000 oo ay ka mid yihiin ururada bulshada, gobolada, dowladaha hoose, ururada diimaha,dugsiyada, warbaahinta, ganacsatada iyo kuwo kale ayaa ka qeyb qaatay tirokoobkii sanadkii 2000. Ka qeybgelidda tirokoobka ee hayadaha kale waxa ay siinaysaa hayadda tirokoobka fursad ay ku gaarayso qof walba oo degan dalka oo aanay heli laheyn kaligood. Ka qeybkale kasta waxaa looga baahan yahay in uu gaariisyo tirokoobka muhiimadda uu leeyahay sida bulshada qeybaheeda kala duwan oo ay xiraan luqadaha iyo joqoraafiga, tusaale ahaan ku wacyi geli shaqooyinka tirokoobka sida macluumaadka lagu qoro wargeysyada ama astaamaha ku yaalo wadooyinka hareerahooda.

Waqtiga uu soconaayo tirokoobka 2010: Taariikhaha Muhiimka ah

Fall 2008	Shaqo qoritaanka tiro koobka ayaa bilaabanayo
Spring 20009	Shaqaalaha tirokoobka waxa ay tegi doonaan albaab walba si ay u hubiyaan cinwaanka guri walba
Fall 2009	Shaqaalaha loo baahan yahay in shaqada qabtaan 2010 ayaa la qori doonaa
February – March 2010	Waxaa loo diri doonaa ama loo geyn doonaa qoys walba su'aalaha
April 2010	Maalinta tirokoobka
April – July 2010	Shaqaalaha ayaa u tegi doonaa qoyskii aan dib u soo celin jawaabaha.
December 2010	Sida sharcigu yahay, heyadda tirokoobka waxa ay tiradii dadka u gudbin doontaa madaxweynaha.
March 2011	Sida sharcigu yahay heyadda tirokoobka waxa ay dhameystiri doontaa dib u qeybinta tirada guud ee gobal walba.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tirokoobka 2010, fadlan waxaad gashaa cinwaanka WWW.census.gov/2010census.